



Jidka 14 waa waddo ay maraan baska maxaliga u shaqeeya oo meelaha badan istaaga asagoona adeeg ka bilaabaya 66th St. ee Richfield ilaa iyo faras-magaalaha Minneapolis ilaa iyo Robbinsdale Transit Center, gaar ahaan waddooyinka Bloomington Ave., West Broadway, iyo waddooyinka 6aad iyo 7aad ee faras-magaalaha Minneapolis.

Metro Transit waxay hagaajinaysaa adeega lagu bixiyo Jidka 14 wuxuuna dhaqan galayaa Juun 13. Marka laga soo tago horumarinta guud, isbeddellada la soo jeediyay ee Jidka 14 waxaa ka mid ah:

- Beddelidda waddooyinka si aan uga dhigno safarka mid degdegga ah jadwaladuna ay noqdaan kuwo la isku halayn karo
 - Waddo dib loo habeeyay/la fududeeyay oo ku yaalo Crystal, Golden Valley, iyo Robbinsdale
 - Dhammaan safarradu waxay sii isticmaali doonaan West Broadway inta u dhaxaysa Golden Valley Rd. iyo Robbinsdale Transit Center
 - U wareeji safarrada koonfur u socda si ay u maraan 8th St. ee ku taalo faras-magaalada
 - Safarrada labada jiha ah waxay ka shaqayn doonaan Hennepin Ave. inta u dhaxaysa Washington Ave. iyo waddooyinka 7aad iyo mida 8aad
 - Dhammaan safarrada aan loo qaadanin dugsiga waxay ka bilaabmaan/ku dhammaadaan 66th St. iyo Richfield Pkwy. ee ku taalo Richfield
 - Adeegga lagu bixiyo Richfield wuxuu u wareegi doonaa Richfield Pkwy. inta u dhaxaysa waddooyinka 63aad iyo mida 66aad
 - **Jidka 48** waa jid cusub oo maxalli ah oo beddeli doonta adeegga 14D ee lagu bixiyo Noble Ave., 36th Ave. N, Douglas Dr., iyo Duluth/Golden Valley Rd. Jidku waxay ka sii socon doontaa Golden Valley Rd. ilaa iyo Penn Ave., Glenwood Ave. iyo faras-magaalaha Minneapolis. Safarradu waxay u shaqeyn doonaan si saacadle ah maalmaha usbuuca oo dhan
- Hagaajinta adeegga 15 daqiiqo kasta oo duhurkii ah iyo waqtiyada ugu mashquulka badan maalmaha shaqada
- Soo noqnoqoshada adeega habeenkii xilliga dambe ah ayaa la hagaajin doonaa ilaa iyo 30 daqiiqo kasta
- Xoojinta joogsiyada basaska ilaa kala fogaanshaha dhan rubuc-mayl si loo kordhiyo waxtarka safarka
- Wax ka beddelida jadwalka
- Ballaarinta aagga aan baabuurta la dhiganin si loo hubiyo in basasku ay si buuxda udul istaagi karaan calaamadaha ku taala joogsiga baska



Qaado ra'yi uruurinta ugu danbayn
Febraayo 27, 2026

surveymonkey.com/r/BBR14

Ama iskaan ku mari koodhan taleefoonkaaga si aad u samayso ra'yi uruurinta.

Nala soo xiriir

CIDA LAGALA XIDHIIDHAYO MASHRUUCA

Julie Martinez, Isku duwaha Wacyigelinta Bulshada
julie.martinez@metrotransit.org

MEDIA CONTACT

John Komarek, Khabiirka Isgaadhsiinta
john.komarek@metrotransit.org

- Ku rakibida shub adag si kor loogu qaado marin u helka macaamiisha
- Ku rakibidda guryo cusub joogsiyada basaska ee u qalma
- Adeeg laga saarayo meesha:
 - Jidada jira ee 14D, 14G, iyo 14N waa meesha waa laga saari doonaa. Adeeg midkaas beddeli doona ayaa laga heli doonaa Jidka 48
 - Ma jiri doonto adeeg kale beddeli doona qaybta meesha laga saaray ee ku taalo 36th Ave. inta u dhaxaysa Noble Ave. iyo France Ave.
 - Safarada aan dugsiga lagu tagin ee mara qaybta Jidka 14E meesha waa laga bixin doonaa. Adeega kale ayaa laga heli karaa jidadla 22, 38, iyo 46
 - Adeegga lagu bixiyo Ramp B/5th St. Transit Center ayaa meesha laga saari doonaa

Jadwalka Mashruuca

Janaayo ilaa iyo Febraayo 2026 Ka-qeybgalka Bulshada

Maarso 2026

Dib u eegida fikradaha iyo soo gabagabayta talooyinka


Juun 13, 2026

Hirgelinta isbeddellada



La qorsheeyay Juun 2026

Jidka 14 Loo Soo Jeediyay in laga dhigo Meeshuu Baska Istaago iyo Isbadelka Toosinta




Qaado ra'yi uruurinta ugu danbayn
Febraayo 27, 2026

surveymonkey.com/r/BBR14

Ama iskaan ku mari koodhan
taleefoonkaaga si aad u samayso
ra'yi uruurinta.

South Minneapolis iyo Richfield



Furah Qariirada

- Jidka 14
- Jidka 14 – jid cusub
- Meesha laga saaray Jidka 14
- Jidka 48 ee cusub
- Joogsiga baska ee hadda jira – wax isbeddel ah laguma samaynin
- ▶ Joogsi bas oo cusub/meel kale loo raray
- Waxaa loogu talagalay baska dugsiga inuu istaago oo kaliya
- ✕ Joogsiga baska ee meesha laga saaray
- Joogsiga baska ee hadda jira oo aan u adeegin Jidka 14

Arag qariirada ay ee
ku tusinayso "South
Minneapolis and Richfield"